MAAMULKA NAAFONIMADA KORIINKA (DDA)

# Xuquuqahaaga sidii macmiilka Maamulka Naafonimada Koriinka Ahaan

Your rights as a client of the Developmental Disabilities Administration

Xuquuqaha hoos ku xusan waa xuquuqaha ugu yar ee loo dammaanad qaaday dhammaan macaamiisha maamulka, oo looguma talagalin in lagu yareeyo xaquuqaha lagu dhigay sharciyada kale ee gobolka ama federaalka ee laga yaabo in ay ku jiraan xuquuqo dheeraad ah.

(1) Maamulka waa in uu ku wargeliyaa shakhsiga iyo wakiilka sharciga ah ee shakhsiga ama haddii loo baahdo wakiilka ku habboon ee dheeriga ah xuquuqaha lagu dhigay cutubka 71A. Xeerka Dib-loo-eegay ee Washington (RCW), sharciga 2020 marka la go'aaminayo in shakhsiga uu yahay qof xaq u leh. Ogeysiiska uu maamulka bixiyo waa in uu noqdaa qaab qoraal ah. Maamulka waa in uu diiwaangeliyaa taariikhda ogeysiiska loogu baahan yahay qayb-hoosaaddan la bixiyay.

(2) Maamulka waa in uu ku wargeliyaa macmiilka iyo wakiilka sharciga ah ee macmiilka ama haddii loo baahdo wakiilka ku habboon ee dheeraadka ah xuquuqaha lagu dhigay cutubka 71A. Xeerka Dib-loo-eegay ee Washington (RCW), sharciga 2020 marka la sameynayo qiimeynta macmiilka. Ogeysiiska uu maamulka bixiyo waa in uu noqdaa qaab qoraal ah. Maamulka waa in uu diiwaangeliyaa taariikhda ogeysiiska loogu baahan yahay qayb-hoosaaddan la bixiyay.

(3) Macmiilka wuxuu xaq u leeyahay in uu adeegsado madax-bannaani iyo doorashada in aysan saameyn ku yeelan faragelinta adeeg bixiyaha. Tani waxaa ku jira xuquuqaha uu macmiilka u leeyahay:

(a) In aysan saameyn ku yeelan xadgudub galmo, jireed, iyo mid dhimir, ciqaab jireed, iyo gooni-sooca aan khiyaariga ahayn;

(b) In aysan saameyn ku yeelan takoorka ku saleysan sinjiga, midabka, caqiidada, asal ahaan dalka uu u dhashey, diinta, jinsiga, naafonimada, da'da, xaalka guurka iyo qoyska, aqoonsiga jinsiga, ama jihada galmada;

(c) In uu sameeyo kala doorasho ku saabsan nooca cuntada laga heli karo gudaha kheyraadka macmiilka iyo qorshaha adeegga;

(d) In dad ay guriga ku soo booqdaan macmiilka iyo in macmiilku uu xiriir la yeesho shakhsiyaadka uu doono oo ku xiran xadidaadaha lagula heshiiyay saaxiibada macmiilka guriga la deggan;

(e) In uu kantaroolo jadwalka macmiilka iyo in uu doorto waxqabadyada, jadwallada, iyo daryeelka caafimaadka ee daboola baahiyada macmiilka;

(f) In uu helo macluumaadka ku saabsan daaweynta uu amray adeeg-bixiyaha daryeelka caafimaadka iyo in laga caawiyo qorsheynta sida daaweynta loo hirgelin doono;

(g) In aysan saameyn ku yeelan daawooyin, xayiraado, iyo xannibaadaha aan loo baahnayn;

(h) In uu codeeyo, ka qaybqaato geeddi-socodka dimuqraadiga ah, iyo in uu dadka ku caawiyo in xil loo doorto;

(i) In uu maareeyo lacagaha macmiilka ama in uu doorto qof caawiya;

(j) In uu ka mid noqdo bulsho;

(k) In uu sameeyo doorashooyin ku saabsan nolosha macmiilka;

(l) In uu doorto dharka uu xiranayo iyo habka qaabeynta ama jarashada timaha ee macmiilka;

(m) In uu u qurxiyo oo uu alaabta u dhigo qolka jiifka ee macmiilka sida uu macmiilku doonayo ama in uu u qurxiyo oo u dhigo alaabta guriga macmiilka sida uu macmiilka doonayo oo ku xiran heshiiska lala galey saaxiibada macmiilka guriga la deggan;

(n) In uu raadsado shaqo mushaar lagu qaato;

(o) In uu helo adeegyada uu macmiilka oggolado in uu helo;

(p) In uu go'aansado in uu cilmi-baaris ka qaybqaato ama in kale ka-dib marka cilmi-baarista loo sharxo macmiilka, iyo ka-dib marka macmiilka ama wakiilka sharciga ee macmiilka uu bixiyo oggolaansho qoraal ah oo loogu talagalay macmiilka si uu uga ka-qaybqaato cilmi-baarista; iyo

(q) In aanan lagula kicin dhiigmiirasho maaliyeed.

(4) Macmiilka wuxuu xaq u leeyahay in uu ka qaybqaato qorsheynta adeegga maamulka. Tani waxaa ku jira xaqa uu macmiilka u leeyahay:

(a) In uu joogo oo uu talo ku darsado qorshayaasha adeegga macmiilka ee ay qoreen maamulka iyo adeeg bixiyayaasha;

(b) In uu helo fursado macne ku fadhiya si uu horseed ugu noqdo geeddi-socodyada barashada;

(c) In uu haysto himilooyinka macmiilka ee nolosha macanaha leh iyo yoolalka macmiilka ee waxbarashada, shaqada, guryeynta, xiriirrada, iyo madadaalada ee lagu daray geeddi-socodka qorsheynta;

(d) In uu doorto qareen macmiilka kala qaybgala geeddi-socodyada qorsheynta; iyo

(e) In uu heli karo macluumaadkii ugu dambeeyay oo sax ah kuna saaban madadaalada, waxbarashada, iyo fursadaha shaqo ee laga heli karo bulshada macmiilka.

(5) Macmiilka wuxuu xaq u leeyahay in uu helo macluumaad ku saabsan adeegyada iyo daryeelka caafimaad. Tani waxaa ku jira xaqa uu macmiilka u leeyahay:

(a) In uu eego nuqulka dhammaan qorshayaasha adeegga macmiilka;

(b) In uu haysto nuqullada dhammeystiran ee qorshayaashii ugu dambeeyay ee adeegga macmiilka;

(c) In uu dib-u-eego nuqullada siyaasadaha iyo habraacyada ee adeeg kasta ee uu macmiilku helo, waqti kasta. Tani waxaa ka mid ah siyaasadaha iyo habraacyada ku saabsan sida macmiilka uu cabasho ugu gudbin karo adeeg bixiyeyaasha iyo waaxda;

(d) In uu eego natiijooyinka sahankii ugu dambeeyay ee waaxda ama baaritaanka ay sameeyeen sahamiyeyaasha dowladda ama kormeerayaasha, bayaannada yaraanta, iyo qorshayaasha sixitaanka ee dhaqangalay marka la eego adeeg bixiyaha macmiilka, iyo degaanka macmiilka. Adeeg bixiyaha macmiilka waa in uu ku caawiyaa macmiilka meel ku sheegidda iyo helidda macluumaadkan marka uu macmiilku codsado; iyo

(e) In uu helo ogeysiiska qoraalka ah ee tallaabooyinka fulinta ah ee ay qaaday waaxda kana dhanka ah adeeg bixiyaha macmiilka. Maareeyaha kiiska ee maamulka ama qofka u xilsaaran waa in ay ogeysiis siiyaan macmiilka iyo wakiilka sharciga ah ee macmiilka ama haddii loo baahdo wakiilka ku habboon ee dheeraadka ah labaatan maalmood gudahooda, iyada oo laga reebayo maalmaha fasaxa ee toddobaadka iyo maalmaha kale ee fasaxa ah, laga soo bilaabo taariikhda fulinta. Ujeeddooyinka qayb-hoosaaddan ahaan, “adeeg bixiye” waxaa loola jeedaa hay’adda bixinaysa adeegyada degaanka/guriga ee uu helay macmiilka ee uu maamulo ama uu qandaraas la galey maamulka. Tallaabada fulina ee u baahan ogeysiiskan waxaa ka mid ah:

(i) Shuruudaha lagu soo rogay shatiga ama aqoonsiga adeeg-bixiyaha;

(ii) Hakinta ama hakinta xaddidan ee soo gudbinta ama aqbalaadda;

(iii) Ku soo rogidda aqoonsi ku meelgaar ah ama ka xayuubinta aqoonsiga; ama

(iv) Diidmada, hakinta, ama kala noqoshada shatiga ama aqoonsiga.

(6) Macmiilka waxaa uu xaq u leeyahay in uu soo gudbiyo cabashooyin iyo ashtakooyin, iyo in uu codsado rafcaanno. Tani waxaa ku jira xaqa uu macmiilka u leeyahay:

(a) In uu rafcaan ka qaato go’aan kasta ee waaxda ee u diidaya, yareynaya, ama joojinaya u-qalmitaanka macmiilka, adeegyada, ama doorashada adeeg bixiyaha sida lagu qeexay sharciga federaalka ee Medicaid iyo sharciyada kaalmada dadweynaha ee gobolka;

(b) In uu u soo gudbiyo ashtakooyinka adeeg bixiyaha macmiilka oo ku saabsan adeegyada macmiilka ama walaacyada kale. Tani waxaa ka mid ah, balse aan ku xaddidnayn, walaacyada ku saabsan hab-dhaqanka dadka kale ee halka macmiilku uu ku nool yahay. Adeeg-bixiyuhu waa in uu joogteeyaa siyaasad qoran oo ku saabsan geeddi-socodka cabashada oo ay ku jiraan waqtiyada iyo xalalka suuragalka ah. Haddii cabasho aanan la xallin, adeeg bixiyaha waa in uu macmiilka siiyaa macluumaad ku saabsan sida loogu gudbiyo cabashada waaxda;

(c) In uu gudbiyo cabashooyin iyo ashtakooyin, iyo in uu codsado rafcaanno iyada oo aan jirin ciqaab ama aargoosi kaga imaanaya waaxda ama adeeg-bixiyeyaasha; iyo

(d) In uu helo macluumaad ku saabsan sida loo helo qabanqaabo ku habboon naafonimada ee hannaanka rafcaanka.

(7) Macmiilka wuxuu xaq u leeyahay asturnaan iyo in aan la shaacin sirtiisa. Tani waxaa ku jira xaqa uu macmiilka u leeyahay:

(a) Asturnaanta shakhsiyeed iyo in aan la shaacin diiwaannada shakhsiyeed ee macmiilka;

(b) In uu si gaar ah dad ula xiriiro, oo ay ka mid yihiin xaqa uu u leeyahay in uu diro iyo in uu helo warqadaha boostada ama iimaylka loo soo diro, iyo xaqa uu u leeyahay in uu telefoonka ku adeegsado meel aan hadalka laga maqli karin; iyo

(c) In uu si gaar ah ula kulmo oo uu ula hadlo saaxiibada iyo qoyska macmiilka.

(8) Macmiilka ayaa xuquuqo leh xilliga ka bixinta, wareejinta, iyo joojinta adeegyada sida lagu dhigay qayb-hoosaaddan.

(a) Macaamiisha deggan xarunta daryeelka muddada dheer sida ku cad cutubka 18.20, 72.36, ama 70.128 Xeerka Dib-loo-eegay ee Washington (RCW) waxaa ay leeyihiin xuquuqaha lagu dhigay RCW 70.129.110.

(b) Macaamiisha hesha adeegyada deggaanka ee bulshada ee la caddeeyay waxay xaq u leeyihiin:

(i) In ay la joogaan adeeg bixiyaha macmiilka. Adeegyada waa in aan la joojin haddii adeeg bixiyuhu uu go'aamiyo oo uu diiwaangeliyo in:

(A) Adeeg bixiyaha uusan dabooli karin baahiyada macmiilka mooyee;

(B) Bedqabka macmiilka ama bedqabka shakhsiyaadka kale ee xarunta ama deggaanka ku jira ay khatar galeyso mooyee;

(C) Caafimaadka macmiilka ama caafimaadka shakhsiyaadka kale ee ku jira xarunta ama degaanka ay si kale ay khatar u galeyso mooyee; ama

(D) Adeeg bixiyaha uu shaqada joojiyo mooyee.

(ii) In ay ogeysiis qoraal ah ka helaan adeeg bixiyaha oo ku saabsan joojin kastoo suuragal ah ee adeegyada ugu yaraan soddon maalmood ka hor joojintaasi, marka laga reebo marka ay jirto xaalad caafimaad ama bedqab oo degdeg ah oo u baahan joojinta adeegga, xaaladaas oo ay tahay ogeysiiska in la bixiyo ugu yaraan toddobaatan-iyo-laba saac ka hor taariikhda joojinta. Ogeysiiska waa in la siiyaa macmiilka iyo wakiilka sharciga ah ee macmiilka ama haddii loo baahdo wakiilka ku habboon ee dheeraadka ah. Ogeysiisku waa in ay ku jiraan:

(A) Sababta loo joojiyay adeegyada; iyo

(B) Taariikhda dhaqangalka ah ee joojinta adeegyada.

(iii) In ay helaan qorshaha kala-guurka ugu yaraan laba maalmood ka hor taariikhda uu dhaqangalayo joojinta adeegyada, ama haddii joojinta lagu saleeyay

xaaladda degdegga ah ee caafimaadka iyo bedqabka in ay ku helaan qorshaha kala-guurka ah laba maalmood gudahooda ka-dib marka uu maamulka helo ogeysiiska joojinta xaaladda degdegga ah. Maamulka waa in uu macmiilka iyo wakiilka sharciga ah ee macmiilka ama haddii loo baahdo wakiilka ku habboon ee dheeraadka ah siiyaa qorshaha. Qorshaha waa in ay ku jiraan:

(A) Goobta macmiilka loo wareejin doono;

(B) Nooca gaadiidka loogu wareegayo goobta cusub; iyo

(C) Magaca, cinwaanka, iyo lambarka telefoonka gardoonka naafonimada koriinka.

(c) Adeeg bixiyaha adeegyada siiya macaamiisha deggan degaanka uu iska leeyahay adeeg bixiyaha waa in uu dhammeeyaa habraacyada joojinta adeegyada ka hor inta aan la bilaabin tallaabo kasta oo haysasho sharci-darro ah ee ku cad RCW 59.12.030.

(9) Macmiilka wuxuu xaq u leeyahay in uu helo qareenno u dooda. Macmiilka wuxuu xaq u leeyahay in uu macluumaad ka helo hay'adaha macmiilka u doodaya, iyo in la siiyo fursad uu kula xiriiro hay'adahan. Adeeg bixiyaha waa in uusan faragelin helidda macmiilka mid kasta oo ka mid ah kuwan soo socda:

(a) Wakiil kasta oo ka socda dowladda;

(b) Takhtarka gaarka ah ee dadka deggan;

(c) Gardoonka naafonimada koriinka; ama

(d) Wakiil kasta ee ka socda ururka loo xilsaaray hirgelinta barnaamijka ilaalinta iyo u-qareemaynta iyada oo la raacayo xeerka RCW71A.10.080.

(10) Haddii macmiilku uu ku waajibo amarka mas'uul ka noqoshada ama haynta iyada oo la raacayo cutubka 11.88 RCW, xuquuqaha macmiilka ee waafaqsan cutubka 71A. Xeerka Dib-loo-eegay ee Washington (RCW), sharciga 2020 waxaa adeegsada mas'uulka macmiilka haddii mawduuca uu ku jiro gudaha baaxadda amarka mas'uul ka noqoshada ama haynta.